

Nuujinta Nuunnaha Dhiciska ah ee Isbitaalka Gudahiisa iyo Guriga

Nuunneyaasha dhasha iyagoo aan sidkoodii u dhamaan waa in lagu hayo qeybta daryeelka dhallaanka. Marka meeshaas lagu hayo, waxay ku baranayaan nuujinta, oo waa wax ay ku sii baran doonaan xataa marka ay guriga tagaan.

Goorma ayaa nuujinta loo bilaabayaa nuunnaha ku jira isbitaalka?

- Waxaa la bilaabayaa marka nuunnaha loo sameeyo shaf-ku-qabasho. Nuunnuhu raaxo ayuu dareemayaa, oo hooyaduna caano badan ayey yeelanaysaa. Marka hore, nuunnuhu xoog ayuu ku yeelanayaa cabbista caano yar. Nuunnuhu markaas ka dib caanaha hooyada waxaa lagu siin karaa masaasad ama tuubbada quudinta.
- Marka uurku marayo 34 ilaa 36 toddobaad, nuunneyaasha badankooda xoog ayey u yeeshaan in la nuujiyo. Nuunneyaasha u baahda in laga caawiyo neefsashada inta ay isbitaalka ku jiraan muddo ayey ku qaadataa in loo bilaabo nuujinta.
- Dhakhtarka carruurta iyo kalkaaliyeyaasha ayaa hooyada u sheegaya marka ay tahay in nuunnaha loo bilaabo nuujinta.



Sidee baa nuunnaha isbitaalka ku jira loogu bilaabi karaa nuujinta?

- Nuunnaha in la baro nuujinta waa hawl adag. Marka hore, nuunnaha waxaa la nuujin karaa 1 ama 2 jeer maalintii. Ku sii wad! Nuunnuhu waxa uu sii baranayaa nuujinta marka lagu sii wado.
- Nuunnaha wuxuu u baahan karaa nasasho marka uu baranayo ee la nuujinayo.
- In dabool la saaro ibta ayaa nuunnaha u fududeyn karta in ka helo caano marka nuunnuhu baranayo nuujinta. Daboolka ibta waxaa lagu isticmaali karaa isbitaalka iyo dhowrka toddobaad ee ugu horreeya marka nuunnaha guriga la geeyo.
- Xusuusnow in aad caanaha iska listo oo aad nuunnaha u sameeyso shaf-ku-qabashada inta uu nuunnuhu baranayo nuujinta si ay caanuhu ugu soo bataan.

Nafaqo badan:

- Marka uu nuunne dhicis ah ku jiro isbitaalka iyo xataa marka guriga la geeyo, nuunnuhu wuxuu u baahan yahay nafaqo badan in loogu daro masaasadda loogu shubayo caanaha hooyada si uu ugu weynaado.
- Marka nuunnuhu kobco oo xoogeysto, nafaqo yar ayuu u baahan doonaa.
- Waxaa la weydiin karaa dhakhtarka nuunnaha muddada nafaqada badan loo baahan yahay in loogu daro caanaha hooyada.



Nuujinta guriga ee nuunnaha loo sameynayo:

- Marka nuunnaha guriga la geeyo, waa in caanaha loo siiyo sidii loogu siinayey isbitaalka gudahiisa. Kala hadal dhakhtarka nuunnaha marka laga beddelayo quudinta.
- Hooyadii rabta, marka nuunnuhu weynaado ayey in badan sii nuujin kartaa oo u lisi karaa caanaha si ay masaasad ugu siiso.
- Kala hadal la-taliyaha nuujinta (waa xirfadleyaal tababar ku haysta sida hooyada looga caawiyo nuujinta nuunneheeda) iyo wixii su'aalo ah oo ku saabsan nuujinta.